

Nuqulada daabacani kaliya waa tixraacyo. Fadlan tixraac koobiga elektorooniga ah u dambeeyay.

Bayaanka Xeerka

Waa xeerka M Health Fairview inay dhammaan bukaanada ka qaado lacag bixinta laga filayo ee haraaga habboon. Inta lagu jiro hanaankaan biilasha iyo lacag qaaditaanka, M Health Fairview waxaa ka go'an inay ku dhaqanto dhaqamada biilasha ee caddaalada ah waxayna qoraalada bukaanaka usoo saari doontaa si bile ah ugu yaraan muddo dhan 120 maalmood. M Health Fairview waxay diyaar u tahay inay bukaanada ka caawiso xalinta lacaga haraadiga ah ee lagu leeyahay, oo ay kujiraan dookhyada la heli karo ayadoo loo maraayo barnaamijka kaalmada dhaqaalaha.

Ujeeddo:

Xeerkan wuxuu qeexayaa nidaamka lacag qaaditaanka iyo biilasha bukaanaka M Health Fairview iyo tallaabooyinka laga yaabo in la qaado haddii ay dhacdo inaan la bixin lacagta, sida talaabooyinka la qaado marka aan la bixin lacag. Mabaadii'da hagaysa xeerkan waxay waafaqsan yihiin Heshiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota waxayna u hogaansan yihiin 501r iyo sharciga gobolka. Intaas waxaa dheer, M Health Fairview waxay si caddaalad ah oo ay ku dheehan tahay xushmad iyo qadarin ula dhaqmi doontaa dhammaan bukaanada iyo damiinqaadayaasha masuuliyiinta (oo halkaan kadib loogu wici doono "bukaanada"). M Health Fairview waxay hubin doontaa in nidaamka aruurinta lacagta iyo biilasha loo raaco si caam ah oo cad, waxayna sameysaa dadaalo macquul ah si loo go'aamiyo in bukaanku u qalmo caymiska ama inuu u qalmo sida ku hoos qoran Siyaasada Kaalmada Dhaqaale ee M Health Fairview.

EMTALA

M Health Fairview waxay daaweyn doontaa bukaanada qaba xaaladaha degdega ah ayadoon u eegin awooda ay u leeyihiin inay lacag bixiyaan oo ayna raacaan Sharciga Daawaynta Xaaladaha Degdegga ah ee Caafimaadka iyo Shaqada (Emergency Medical Treatment and Labor Act (EMTALA)). EMTALA waxay isbitaalada qaba waaxaha xaaladaha degdega ah uga baahan tahay inay bukaan kasta oo yimaada waaxdooda xaaladaha degdega ah ama codsada inay siiyaan baaritaan caafimaad sida qiimeynta waxayna ka mamnuucaysaa cusbitaalada leh waaxaha xaaladaha degdegga ah inay diidaan inay baaraan ama daweyaan shaqsiyaadka qaba xaaladaha caafimaad ee degdeg ah. Erayga "Hospital" waxaa kujira qiimeenada muhiimka ah ee ay sameeyaan isbitaaladu.

Qeexitaanno:

ECAs – Tallaabooyinka Aan Caadiga Ahayn ee Lacag Qaaditaanka (ECA): Waxa kamid ah hawlaha uruurinta lacagta ee soo socda:

- Ka iibinta deynta bukaanaka qolo kale badi xaaladaha.
- U-sheegidda macluumaadka deynta ee sumcadda xun ee ku saabsan bukaanaka wakaaladda deynta.
- Dib-u-dhigista ama diidmada daryeelka caafimaad ee hadda lagama-maarmaanka ah maadaama ay jirto lacag hore oo aan la bixin ama u baahashada in la bixiyo lacag aan hore loo bixin ka hor inta aan la bixin daryeelka hadda caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah.
- Tallaabooyinka u baahan hannaan sharci ama garsoor; oo ay ku jiraan qaadashada hantida, qaadashada mushaharka, qaadashada ama heynta lacagta bangiga, bilowga tallaabo madani ah, iyo tallaabooyinka kale ee sharciyeed ee la cayimay.

Mulkiilaha dukumiintiga: Bree Cissell (Agaasimaha Nidaamka – Mareegta Dakhliga)

Taariikhda ansixinta: 05/13/2024

Markii ugu danbaysay ee la Saxay: 05/13/2024

Waxaa ansixiyay: Fairview Board of Directors, Fairview Range Board of Directors, Grand Itasca Clinic and Hospital Board of Directors, Chief Revenue Officer

Nuqulada daabacani kaliya waa tixraacyo. Fadlan tixraac koobiga elektorooniga ah u dambeeyay.

Baahida Caafimaad – Adeegyada daryeelka caafimaadka ama alaabada uu takhtarka taxadar leh uu u fidin doono bukaanka ujeedada ka hortagga, ogaanshaha, ama daaweynta jirro, dhaawac, cudur, ama calaamadihiisa:

- Iyadoo la raacayo heerarka guud ee la aqbalay ee ku dhaqanka caafimaadka.
- Caafimaad ahaan ku habboon nooca, inta jeer, xadka, goobta, iyo muddada; iyo
- Aan ugu horrayn faa'iidada dhaqaale ee qorshayaasha caafimaadka iyo iibsadayaasha ama ku habboonaanta bukaanka, dhakhtarka daawaynaya, ama bixiyayaasha kale ee daryeelka caafimaadka

Habraac:

I. Biil bixinta bukaanka:

Waa hadafka M Health Fairview inay biilka ku dalacdo shirkada caymiska iyo/ama bixiyayaasha qolo saddexaad sida ku habboon iyo waqtiga ku habboon. Dhaqdhaqaaqa koontada ku haboon ayaa la samayn doonaa, oo ay ku jiraan shaqaalaha la shaqeeya iyo/ama qandaraaslayaasha, si loo hubiyo in daalka buuxa la sameeyay si loo ururiyo lacag bixinta la filayo oo si buuxda loo xalliyo hadhaaga akoontiga. Macluumaadku wuxuu ku xiran yahay saxnaanshaha xogta iyo waqtiga nidaamka lacag bixiyayaasha. M Health Fairview waxay bixin doontaa ogeysiiska lacagaha haraadiga ah waxayna ka caawin doontaa bukaanada inay degsadaan nidaam lacag bixin oo macquul ah ama inay dookhyo kaalmo dhaqaale oo kasta oo kale. Hanaanka biil dalbashada waxaa taageeri doona tilmaamaha soo socda:

- A. Dhammaan bukaanada caymiska haysta, M Health Fairview waxaay kharashka ku dalaci doontaa shirkadaha caymiska ee saddexaad, oo ay ku jiraan caymiska dawlada iyo kuwa kale ee la xaqiijiyey sida ku habboon (ee uu bixiyay ama uu xaqiijiyo bukaanku), marka laga reebo shuruudahaan soo socda:
 1. Caymiska waddanka ka baxsan - Bukaanka waxa la siiyaa nuqulka codsiga lacagta si uu ugu gudbiyo caymiskiisa marka bukaanka codsado. M Health Fairview waxay lacagta ka filanaysaa bukaanka 90 maalmood gudahood. M health Fairview waxa laga yaabaa inay, marka ay doonto iyadoo ku saleynaysa kiis-ka-kiis inay lacagta ka codsato caymiska dalka ka baxsan iyadoo metelaysa bukaanka.
- B. Sida waafaqsan Heshiisyada Heerarka Ururinta Guud ee hadda M Health Fairview iyo sharciga gobolka, dhammaan bukaanada aan caymiska lahayn ee ku nool oo ku leh ciwaanka shaqeynaya gudaha Mareykanka ee hela adeegyada caafimaad ee lagama maarmaanka u ah isbitaallada waxay heli doonaan qiimo dhimis aan caymis lahayn. Qiimo-dhimista aan caymiska lahayn waxay la mid noqon doontaa wadarta guud ee ugu hooseysa bixiyaha dib loogu soo celin doono adeeggaas ama daawaynta bixiyaha cida saddexaad oo aan dawli ahayn. iyo wixii baaqi ah ee hadhay waxa lagu dalaci doonaa bukaanka iyada oo qayb ka ah nidaamka biilasha caadiga ah ee M Health Fairview. Dhammaan bukaanada waxa laga yaabaa inay codsadaan bayaan kooban oo xisaabtooda koontadooda ah wakhti kasta iyagoo soo waca Adeegga Macmiilka ee M Health Fairview 612-672-6724 ama telefoon bilaasha 1-888-702-4073, Grand Itasca Clinics & Hospitals 218-999-1710 ama Adeegga Macmiilka ee Range Fairview 218-362-6624.
 - a. Dhammaan bukaanada aan caymiska haysan ee isbitaalka loogu adeeggo waa in lagu sameeyaa tijaabada u qalmida caawimaada dhaqaalaha 30 maalmood gudahood marka ay adeegga helaan.

Mulkiilaha dukumiintiga: Bree Cissell (Agaasimaha Nidaamka – Mareegta Dakhliga)

Taariikhda ansixinta: 05/13/2024

Markii ugu danbaysay ee la Saxay: 05/13/2024

Waxaa ansixiyay: Fairview Board of Directors, Fairview Range Board of Directors, Grand Itasca Clinic and Hospital Board of Directors, Chief Revenue Officer

Nuqulada daabacani kaliya waa tixraacyo. Fadlan tixraac koobiga elektorooniga ah u dambeeyay.

- C. Haddii sheegashada uu diido (ama uusan ka baaraandegin) bixiyahu sababtuna tahay khalad ay sameysay M Health Fairview, M Health Fairview ka ma soo codsan doonto bukaanka qaddar ka badan tan uu bukaanku mas'uul ka ahaa haddii bixiyahuu bixin lahaa sheegashada.
 - D. Haddii sheegashada uu diido (ama uusan ka baaraandegin) bixiyahu sababtuna tahay arrimo aysan kaantaroolin M Health Fairview, shaqaalaha M Health Fairview ayaa dabaggal habboon ku sameyn doona bixiyaha iyo bukaanka si ay u fududeeyaan xallinta sheegashada. Haddii xalka sheegashadu dhici waydo kadib marka la sameeyo dadaalada dabagalka macquulka ah, M Health Fairview waxa laga yaabaa inay kharashka ku dalacdo bukaanka.
 - E. Dhammaan bukaanadu waxay fursad u haystaan inay la xiriiraan M Health Fairview si ay oga hadlaan arrimaha ku saabsan diyaarinta lacag bixinta ama ikhtiyaarada kaalmada dhaqaale ee koontadooda waqti kasta oo hawsha lacag bixinta lagu jiro.
- II. Ururinta Bukaanka iyo Ururinta Wakaalada:
- A. Ugu yaraan 3 bayaan oo kaladuwan oo loogu talagalay uruurinta xisaabaadka ayaa lagu bixiyaa MyChart ama USPS si wax looga qabto faylka bukaan kasta. Waa waajibka bukaanka/damaanad qaadaha inuu bixiyo cinwaan boosto oo sax ah waqtiga adeegga ama marka uu guuro. Haddii koontada aysan lahayn cinwaan sax ah, waxaa la saari doonaa calaamad waxaana loo habbeyn doonaa si waafaqsan M Health Fairview. Bayaanada koontada hore ee kharashka iska bixinaaya ayaa lagu dari doonaa laakiin kuma koobna:
 1. Nuxurka saxda ah ee adeegyada uu daboolay bayaanku
 2. Ogeysiis qoraal ah oo ogeysiinaya isla markaana wargelinaya bukaanka helitaanka taageerada dhaqaale ee hoos timaada siyaasada Kaalmada Dhaqaale ee isbitaalka, oo uu ku jiro lambarka taleefanka ee waaxda iyo cinwaanka bogga interneetka ee laga heli karo nuqullada dukumiintiyada.
 - B. Haddii bukaanku dood ka keeno koontadiisa iyo/ama codsado dukumentiiyo ku saabsan lacagta, M Health Fairview waxay ku bixin doontaa dukumentiiyada la codsaday qoraal ahaan 7 maalmood gudahood. Bayaanada biil bixinta ee M Health Fairview waxay bixiyaan xogta saxda ah iyo nidaamka xalka khilaafaadka ee waafaqsan Heshiiska Qareenka Guud ee sharciga gobolka ee Minnesota.
 - C. Tabashsooyinka daryeelka bukaanka waxa lagu maareyn doonaa hannaanka xallinta cabashada bukaanka iyo jawaabta bukaanka. Koontada(ooyinka) waxa loo maamuli doonaa si habboon.
 - D. Ayadoo la adeegsanaayo bayaanada biilasha, waraaqadaha, xiriirka nidaamka, iyo wicitaanno telefoon, M Health Fairview waxay qaadi doontaa tallaabooyin dabagal ah oo adag si ay ula xiriirto bukaanada si ay u xalliso kharashaadka aan la bixin. Haddii kharashaadka aan la xaliln dhammaadka hawsha bayaanka ee biilasha, haraadiyada u qalma ee aan la bixin waxa loo gudbin karaa hay'ad saddexaad oo aruurisa lacagta. Wixii su'aalo ah, fadlan kala xidhiidh Adeegga Macamaiisha ee M Health Fairview 612-672-6724 ama wac taleefanka bilaash ah 1-888-702-4073, Grand Itasca Clinics & Hospitals 218-999-1710, ama Adeegga Macaamiisha ee Range Fairview 218-362 -6624.
 - E. Wakaaladaha Lacag Qaaditaanka oo wakiil ka ah M Health Fairview waxay:
 1. Aruurin doontaa dhammaan kharashaadka haray oo buuxa
 2. Baadh oo tixraac Kaalmada Dhaqaale
 3. Dejin doonaa qorshooyin lacag bixin oo macquul ah
 4. Fududeyn doontaa inay bayaanada sida ugu habboon u sameyso

Mulkiilaha dukumiintiga: Bree Cissell (Agaasimaha Nidaamka – Mareegta Dakhliga)

Taariikhda ansixinta: 05/13/2024

Markii ugu danbaysay ee la Saxay: 05/13/2024

Waxaa ansixiyay: Fairview Board of Directors, Fairview Range Board of Directors, Grand Itasca Clinic and Hospital Board of Directors, Chief Revenue Officer

Nuqulada daabacani kaliya waa tixraacyo. Fadlan tixraac koobiga elektorooniga ah u dambeeyay.

5. Aqoonsan doontaa caymiska shaqeyo waxayna xisaabaadka ku celin doontaa M Health Fairview
6. Aqoonsan doontaa xisaabaadka kacay iyo akoonada dadka dhintay waxayna dib ugu celin doontaa M Health Fairview
7. Wax ka qaban doontaa khilaafaadka bukaanada ee ay sida toos ah oga qabaan M Health Fairview
8. Iskugu dabaridi doontaa dhammaan akoonada halka bukaan waxayna ka dhigi doontaa hal bayaan oo lacag aruurin.

III. Ururinta Sharciga ah iyo Talaabooyinka Aan Caadiga Ahayn ee Lacag Ururinta:

- A. Ugu yaraan 120 maalmood ayaa la siin doonaa laga bilaabo taariikhda caddaynta biilasha kadib ee bukaanka ka hor inta aan ECA-yada la qaadin. M Health Fairview waa inay sidoo kale bixisaa ugu yaraan 240 maalmood oo laga bilaabo taariikhda ku qoran bayaankaas si bukaanku u cosado daryeelka samafalka ah ee hoos imaada FAP. Waaxda Mareegta Dakhliga ayaa leh awooda kama danbaysta ah ee go'aaminta haddii dedaallada ku haboon la sameeyay si loo go'ansho in qof uu u qalmo iyo in kale caawimaada dhaqaalaha kahor inta aysan samayn ECA ka dhan ah shaqsiyaadka.

IV. Adeegga macaamiilka:

Inta lagu guda jiro hanaankaan dalbashada iyo ururinta lacagta, M Health Fairview iyo wakiiladeedu waxay bixin doonaan adeeg macmiil oo tayo leh iyagoo hirgelinaya hagayaashaan:

- A. M Health Fairview iyo wakiiladeeda ayaa ilaalin doona habsocodka la hagaajiyay ee su'aalaha iyo/ama khilaafaadka bukaanka oo ay ku jiraan:
 1. telefoon lambar bilaasha ah oo bukaanka soo wici karo
 2. Ciwaan iimayl kaasoo bukaannada fariimo ku qori karaan
 3. Ciwaan xafiis kaasoo laga yaaba in ey fariimo usoo qori karaan
 4. Awoodda fariimaha MyChart
 5. Macluumaadkani wuxuu ku qornaan doonaa dhammaan bayaanada codsiga iyo ururinta lacagaha ee ay dirto M Health Fairview.
- B. Inta lagu jiro wacitaanka bukaanka, M Health Fairview iyo wakiiladeedu waxay ka jawaabi doonaan su'aalaha, dib u eegi doonaan xisaabta, oo waxay siin doonaan macluumaad faahfaahsan bukaanka. M Health Fairview iyo wakiiladeeda waxa laga yaabaa in ay u gudbiyaan su'aalaha waax kale oo ka mid ah M Health Fairview si dib loogu eego marka ay habboon tahay.
- C. M Health Fairview iyo wakiiladeeda ayaa meel marin doona siyaasad aan u dulqaadan aflagaaddada, dhibaateynta, cayda, luuqada khiyaanada leh ama marin-habaabinta ah ee ay sameeyaan shaqaaladeedu.

V. Khilaafyada , cabashooyinka, iyo Xalinta

- A. Kadib marka ay helaan xiriir is-khilaafsan ah oo ka timid bukaanka, M Health Fairview iyo wakiiladeeda ayaa dib u eegi doona cabashada oo uga jawaabi doona qoraal sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah laakiin 7 maalmood gudahooda marka loo eego nidaamka
- B. M Health Fairview iyo wakiiladeedu waxay yeelan doonaan diiwaanka ashkatooyinka iyo cabashooyinka bukaanka (hadal ama qoraal).

Mulkiilaha dukumiintiga: Bree Cissell (Agaasimaha Nidaamka – Mareegta Dakhliga)

Taariikhda ansixinta: 05/13/2024

Markii ugu danbaysay ee la Saxay: 05/13/2024

Waxaa ansixiyay: Fairview Board of Directors, Fairview Range Board of Directors, Grand Itasca Clinic and Hospital Board of Directors, Chief Revenue Officer

Nuqulada daabacani kaliya waa tixraacyo. Fadlan tixraac koobiga elektorooniga ah u dambeeyay.

- C. M Health Fairview iyo wakiiladeeda ayaa meel marin doona siyaasad aan u dulqaadan aflagaaddada, dhibaateynta, cayda, luuqada khiyaanada leh ama marin-habaabinta ah ee ay sameeyaan shaqaalaheedu.
- VI. Diyaarsanaanta Siyaasadda:
- A. Nuqulada elegtarooniga ah ee xeerka Lacag-bixinta iyo Ururinta ee M Health Fairview, xeerka Caawinta Maaliyadeed ee M Health Fairview iyo foomka Codsiga Kaalmada Dhaqaale waxaa laga heli karaa boggeena internetka: <https://mhealthfairview.org/billing>
- B. Waxaad la xiriiri kartaa mid kamida Xafiisyadeena Dhexe ee Shaqada si aad u codsato nuqulada xeerarka laguuguna soo diro boostada ama si aad ugala hadasho arjiga caawimaada dhaqaale ee Charity Care iyo hanaanka u qalmida.
1. Fairview Health Services waxa lagala xiriiri karaa 612-672-6724 ama khadka bilaashka ah ee 1-888-702-4073
 2. Fairview Range Medical Center waxa lagala xiriiri karaa 218-362-6624 ama khadka bilaashka ah ee 1-877-390-6624
 3. Isbitaalada iyo Rugta Caafimaadka ee Grand Itasca 218-999-1710
- C. Nuqulada warqada ah ee xeerarkeena iyo foomka arjiga caawimaada Dhaqaalle ee Charity Care waxa laga heli karaa mid kamida xafiisyadeena biilasha iyo sidoo kale goob kasta oo isbitaal ah.
1. Range Medical Center: 750 E 34th Street, Hibbing, MN 55746
 2. Isbitaalada iyo Rugta Caafimaadka ee Grand Itasca: 1601 Golf Course Road, Grand Rapids, MN 55744
 3. Mid kasta oo ka mid ah goobaha ku taxan qaybta "Waxay Qusaysa laakiin ku ma koobna" qaybta xeerka

Tixraacdo :

Midna

Kheyraad :

Midna

Qusaysa laakiin aan ku koobnayn:

Xarumaha caafimaadka isbitaalka ee gurmada degdega ah

Isbitaalada iyo Rugta Caafimaadka ee Grand Itasca

Xarunta Caafimaadka ee Lakes Medical Center ee M Health Fairview

Xarunta Caafimaadka ee Northland ee M Health Fairview

Xarunta Caafimaadka Fairview Range

M Health Fairview Ridges Hospital ayaa qaatay siyaasadan.

Isbitaalka Southdale ee M Health Fairview

Isbitaalka M Health Fairview St John's Hospital

Xarunta St Joseph's ee M Health Fairview

M Health Fairview Masonic Children's Hospital

Mulkiilaha dukumiintiga: Bree Cissell (Agaasimaha Nidaamka – Mareegta Dakhliga)

Taariikhda ansixinta: 05/13/2024

Markii ugu danbaysay ee la Saxay: 05/13/2024

Waxaa ansixiyay: Fairview Board of Directors, Fairview Range Board of Directors, Grand Itasca Clinic and Hospital Board of Directors, Chief Revenue Officer

Xeer

Biilasha iyo lacag qaaditaanka

Nuqulka 5

Tixraac # 5387

Nuqulada daabacani kaliya waa tixraacyo. Fadlan tixraac koobiga elektorooniga ah u dambeeyay.

Xarunta Caafimaadka Jaamacadda Minnesota ee M Health Fairview
M Health Fairview Woodwinds Hospital

Mulkiilaha dukumiintiga: Bree Cissell (Agaasimaha Nidaamka – Mareegta Dakhliga)

Taariikhda ansixinta: 05/13/2024

Markii ugu danbaysay ee la Saxay: 05/13/2024

Waxaa ansixiyay: Fairview Board of Directors, Fairview Range Board of Directors, Grand Itasca Clinic and Hospital Board of Directors, Chief Revenue Officer